

# HELITAANKA BUUNDADA LEEXSASHADA (BUUNDADA HOOSE) EE WADADA SPOKANE (SPOKEANE ST SWING BRIDGE)

Buundada hoose waxay inta badan maalinta ka xiran tahay socodka guud ee gaadiidka.

WEEKDAYS	MON - FRI		WEEKENDS	SAT - SUN	
	12 AM			12 AM	
1 AM		1 AM			
2 AM		2 AM			
3 AM		3 AM			
4 AM		4 AM			
5 AM	CLOSED	5 AM			
6 AM		6 AM			
7 AM		7 AM			
8 AM		8 AM	CLOSED		
9 AM		9 AM			
10 AM		10 AM			
11 AM		11 AM			
12 PM		12 PM			
1 PM		1 PM			
2 PM		2 PM			
3 PM		3 PM			
4 PM		4 PM			
5 PM	5 PM				
6 PM	6 PM				
7 PM	7 PM				
8 PM	8 PM				
9 PM		9 PM			
10 PM		10 PM			
11 PM		11 PM			

## SIYAASADDA MARITAANKA BUUNDADA HOOSE

Maritaannada waa ku meel gaar ilaa dhamaadka 2021. Haddii ay ka jirto buundada hoose saxmad aad u fara badan, waxanu yareyn karnaa maritaanka xittaa ka hor si loogu helo marin gaadiidka gurmada deg-degga ah. Xeerkan ayaa sii jiri doona ilaa buundada sare dib loo furo bartamaha 2022.

### Isniin ilaa Jimce:

5-ta subax ilaa 9-ka fiidkii

### Sabti iyo Axad:


8-da subax ilaa 9-ka fiidkii



### Adkeyn maritaanka iyo ganaax 75 doolar oo jidka dhinac

Raadi waddo aad ku leexato [www.seattle.gov/transportation/lowbridge](http://www.seattle.gov/transportation/lowbridge)

Wax ka ogow siyaabo aad meelaha ku tagi karto gaari la'aan [flipyourtrip.org](http://flipyourtrip.org)



Buundada hoose waaxaa lagu xiridoonaa kaamrada wadooyinka. Baabuurta aan loo oggolaanin waxey heli doonaan 75 doolar ganaax socod kasta ay ku maraan buundada hoose xilliyada saacadaha la adkeeyey.

Booliiska Seattle ayaa sidoo kale laga yaabaa in la istaajiyo meelaha u dhow buundada hoose si looga fiiriyo baabuurta aan loo oggolayn. Darawalada lagu qabto taargo qarsoon ama maqan waxay heli doonaan ganaax \$ 231 ah. Dadka wada baabuurta emerjensiga, basaska, iyo xamuulka waxey isticmaali karaan buundada dhammaan saacadaha maalintii mana u baahna iney codsadaan maritaan ama ay u keenaan SDOT leysinka taargada.



Waddada socodka buundada hoose waxey u furan tahay maalintii oo dhan iyo saacadaha oo dhan dadka soconaya, rucleynaya, isticmaalaya mootada lugta korontada, ama baaskiileynta.

## KA WARRAN HADDII AY JIRTO DEG-DEG UNA BAAHAN NAHAY INAAN KU DUL WADO BUUNDADA HOOSE?

Waan la soconnaa in emerjensigu dhaco, waxadna u baahan kartaa inaad u wadato cisbitaal halkii aad ka wacan laheyd ambalaas ama socod kaga gudubto buundada emerjensi kale darteed. Tikidhka wuxuu ahaan doonaa 75 doolar waxana ku jiri doona tilmaamo ku saabsan sidaad uga murmi laheyd. Kuuma xaqiijin karno inaad masuul ka noqoneynin bixinta ganaaxa, tani waxa go'aandeeda kama dambeysta ah iska leh Maxkamadda Munishiibiyada Seattle.

### Warbixinta Mashaaraca iyo la Xiriirka

Webseyd: [www.seattle.gov/transportation/lowbridge](http://www.seattle.gov/transportation/lowbridge)

limeel: [westseattlebridge@seattle.gov](mailto:westseattlebridge@seattle.gov) | Telefoonka: (206) 400-7511



**Seattle**  
Department of  
Transportation

## KOOXAHA ISTICMAALA EE WEYDIISAN KARA MARITAAN

Maritaanka maalintii buundada hoose waa la adkeeyey si loo hubiyo in xamuulka, iyo gaadiidka gurmada deg-degga ah ay ugu safri karaan si mug leh aaditaanka ama ka soo laabashada Galbeedka Seattle. Kooxaha soo socda waxey codsan karaan isticmaal kooban buundada hoose.



Dadka aadaya iyo ka soo laabanaya daaweyn caafimaad naf lagu badbaadinayo (oggolaansho ka yimaada dhaqtarkaaga caafimaadka ayaa loo baahan yahay); sii maridda Galbeedka Seattle; waxa ka mida u wadasho daaweyn jidka Feeriga Fauntleroy



Shaqaalaha caafimaad ee wicitaanka (kaliya aadaya ama ka imanaya shaqo wicitaan ah; caddeyn loo shaqeeyaha ayaa loo baahan yahay)



Maqaayadaha iyo tukaamada tafaariiqda fadhigoodu yahay (waxey ku kooban yihiin safarro deg-deg ah oo ay ku soo qaadanayaan alaabo ama badeecooyin)



Baabuurta raaciddooda la wadaago (faananka la isla raaco ama baabuurta la wada raaco ee rasmiga ah ee wata [leysin taargo gobolku soo saaray](#); Tani macnaheedu MA AHA iney ku jiraan Uber/Lyft ama Tagaasida)



Ganacsiyada xeebaha iyo warshadaha ku dhow buundada hoose (waxey ku kooban yihiin socdaallada deg-degga ah si ay usoo qaataan qalab ama ay ku wadaan shaqaalaha muhiimka)



Baabuurta dowladda (waxey ku kooban yihiin kuwa deg-deg ah/socdaallada aan la qorsheynin)



## SIDEE BAAD KU CODSAN KARTAA

Ka codso maritaanka buundada hoose [www.seattle.gov/transportation/lowbridge](http://www.seattle.gov/transportation/lowbridge) ama adigoo isticmaalaya koodka QR ee boggan. Codsiyadu waxey diyaar ku yihiin luqadaha soo socda: Ingiriis, Isbaanish, Kuuriyaan, Soomaali, Shiinees (soo jireenka ah), Fiitnaamiis, Oromo, iyo Khamer. Si aad u weydiisato codsiyada ku qoran luqadaha kale ama qaab warqadeed ah, fadlan nagala soo xiriir [WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov) ama 206-400-7511



**Waa inaad codsataa, keentaa leysinka taargadaada, la kulantaa baahida u qalmidda, kuuna oggolaataa SDOT ka hor isticmaalka buundada hoose.**

Warbixinta Mashuraca iyo la Xiriirka

Webseyd: [www.seattle.gov/transportation/lowbridge](http://www.seattle.gov/transportation/lowbridge)

lIMEEL: [westseattlebridge@seattle.gov](mailto:westseattlebridge@seattle.gov) | Telefoonka: (206) 400-7511



**Seattle**  
Department of  
Transportation